



Madaxtooyada Dowladda Puntland War-saxaafadeed

TTIX/008/2019

February 21, 2019

Shirkii Golaha Xukuumadda Dowladda Puntland oo uu Shir Guddoominayey Madaxweynaha Dowladda Puntland **Mudane Siciid Cabdullaahi Deni**, ayaa looga hadlay arrimaha kala ah, Amniga Dalka, Xeer Hoosaadka Golaha Xukuumadda, Qorshaha Horumarinta Puntland, Kicinta Dakhliga, Wadashaqeynta Wasaaradaha iyo Warbixino kale.

Xaaladda Amniga Dalka:

Golaha Xukuumadda Dowladda Puntland oo warbixin ka dhagaystay Wasaaradda Amniga ayaa sheegay in guud ahaan xaaladda amni ee dalku sugan yahay, waxayna goluhu sheegeen in ay shacabku si dhow ula shaqeeyaan laamaha amniga ee u taagan xasiloonida iyo nabadgeliyada guud ee Puntland, si looga hortago nabadidka iyo cadowga hunguriyeynaya xasiloonida Puntland Waxuu Madaxweynaha Dowladda Puntland Mudane Siciid Cabdullaahi Deni sheegay in isbedel muuqda lagu sameynaayo kantroolada iyo marinada magaalooyinka waaweyn, isla markaana sharci laga soo saari doono lagu xakameynaayo hubka sharci-darada ah.

Xeer Hoosaadka iyo Qorshaha Xukuumadda:

Fadhigii 1-aad ee Golaha Xukuumadda Dowladda Puntland ayaa diiradda lagu saaray guud ahaan arrimaha la xiriira habsami u socodka howlaha shaqo ee xukuumadda, iyadoo loo qeybiyey golaha xeer hoosaadka Golaha Xukuumadda, waxaana uu Madaxweynaha Dowladda Puntland u sheegay Golaha Xukuumadda inay diyaariyaan qorshe howleedka Dowladda 2019 (**work Plan**), isla markaana Wasaaradahu u diyaargarobaan qorshaha hormarinta Puntland (**Puntland five year Development Plan**) Qorshayaashaas oo ay hogaamin doonto Wasaaradda qorshaynta, Hormarinta dhaqaalaha iyo xiriirka caalamka.

Wadashaqeynta iyo Kicinta Dakhliga:

Golaha Xukuumadda Dowladda Puntland ayaa kulan koodii khamiis laha ahaa si xeel dheer uga faalooday kicinta dakhliga iyo wadashaqeynta hay'addaha Dowladda, gaar ahaan laamaha soo xareynta dakhliga, waxayna Wasaaradda Maaliyaddu soo bandhigtay qorshe cusub oo kor u qaadaya dabagalka iyo hufnaanta habka soo xareynta dakhliga Dowladda.

Warbixino:

Ugu dambeyn Madaxweynaha Dowladda Puntland **Mudane Siciid Cabdullaahi Deni** iyo Madaxweyne ku-xigeenka Puntland **Axmed Cilmi Cismaan (Karaash)** ayaa warbixino ka dhageystay Wasaaradaha oo ka warbixiyey qorsheyaashooda shaqo, gaar ahaan dar-dargelinta qorshaha hormarinta Dowladda Puntland.